



Ogeysiiska Waaliddiinta ee Fasixdda Xogta Ardayga – Maktabadaha Minnesota

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay bah-wadaag la sameeyeen Maktabadaha Dadweynaha ee Saint Paul si ardayda Dugsiyada Dadweynaha loo siiyo kaarka makatabadaha oo electronic-ah (Library Go) iyagoo si bilaash ah ku heli doona macluumaadka ku keydsan maktabadaha. Kaararkan oo loo yaqaano e-cards waxay ku habboonyihiin ooy la fal-gali karaan waxbarashada gaar ahaaneed ee shakhsiga iyo waliba inta fasalka dibadiisa la joogo. Ardayda horay u haysatay kaarka maktabada, mar labaad ayay kaarka maktabada ka helayaan iskuulkooda.

Maktabadaha Dadweynaha ee Saint Paul uma shaandheeyaan macluumaadka ku keydsin gudaha maktabada si waafaqsan da'da qofka iyo inuu yahay qaan-qaadh. Kaararka maktabada ee Library Go eCards ee la siinayo ardayda PreK-12 waxay u shaqeynayaan sida kuwa bulshada kale ee caadiga ah la siiyo oo wax xayiraad ah oo gaar ah ma saarna.

Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho, fadlan booqo: sppl.org/go.

Ogow – Qalabka ay ardaydu ku amaahdaan si electronic-ah wax ganaax lacageed ah kama dhalanayo, laakiin qalabka ay si toos ah uga amaahdaan maktabada ee luma waxaa ka dhalanaya ganaax lacageed. Ma jiri doono ganaax lacaageed oo la xiriira haysashada kaarka maktabada ee Library Go - eCards ee ardayda.

Si ardayda loogu sameeyo kaararka eCards, Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay ku qasbanyihiin inay macluumaadka qaarkood ee ardayda ay la wadaagaan Maktabadaha Dadweynaha ee Saint Paul.

Marka la eego Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul, macluumaadkan hoos ku daabacan ee ku saabsan xogta ardaygaaga waxaa loo aqoonsanyahay inay ka mid yihiin macluumaadka diiwaanka dadweynaha oo u furan in dhammaan ay bulshadu ogaan karto haddii uusan waalidku dalbanin in la asturo:

- Magaca
- Taariikhda Dhalashada
- Heerka Fasalka
- Macluumaadka Manhajka dheeraadka ah (oo ay ka mid yihiin dherarka iyo miisaanka ciyaartoyda)
- Iskuulka
- Taariikhda Diiwaan-galinta
- Abaal-marinta Ardaygu helay

Intaas waxaa dheer, Maktabadaha Gobolka Minnesota, macluumaadkan hoos ku daabacan ee ku saabsan xogta ardayga waxaa loo aqoonsanyahay inay ka mid yihiin macluumaadka diiwaanka dadweynaha oo u furan in dhammaan ay bulshadu ogaan karto haddii uusan waalidku dalbanin in la asturo:

- Cinwaanka Guriga
- Lambarka Ardayga ID#

- Teleefanka Guriga
- Email-ka Ardayga

Si aadan u oggolaanin in ilmahaagu ka mid noqdo barnaamijka kaarka maktabada ee Library Go eCard, islamarkaana macluumaadka ardaygaaga aan loogu gudbinin Maktabadaha Gobolka Minnesota, waxaa khasab ah inaad foomkan soo buuxiso kuna soo celiso Waaxda Diiwaanka iyo Meelaynta oo cinwaankeedu yahay: 2102 University Avenue West Saint Paul, MN 55114.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo spps.org/studentrecords ama soo wac waaxda Diiwaanka Ardayga 651-632-3764.

Waxaan fahamsanahay haddii aan sixiixo foomkan in ilmahaagu uusan helaynin kaarka Maktabadaha Dadweynaha ee Saint Paul ee ay bixayaan Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul.

Waxaan fahamsanahay sixiixitaanka foomkan inuusan ka celin karin in diwaanka macluumaadka ee ardayga ay heli karaan dad kale, laakiin uu ka celin karo Maktabadaha Gobolka Minnesota oo kaliya.

Waxaan fahamsanahay haddii aan rabo in diwaanka macluumaadka ee ardaygayga aan cidna lala wadaagin, inaan soo buuxiyo foomka laga helayo diwaanka ardayda ee <http://spps.org/studentrecords>) Waaxda Meelaynta Ardayda.

Waxaa kale oon fahamsanahay in diidmadani dhaqan-gashanaanayso ilaa aan anigu wax ka baddalo, qoraal aan kaga noqdo, ama aan ardaygayga kala laabto diiwaan galinta.

Magaca Ardayga: _____ Taariikhda: _____
Iskuulka: _____ Fasalka: _____
Magaca Waalidka (qor): _____ Lambarka Ardayga ID#: _____

Saxiixa waalidka (ama ardaygu hadduu yahay qaan-gaar)

Taariikh:

**Fadlan foomkan ku soo celi Waaxda Diiwaanka iyo Meelaynta oo cinwaankeedu yahay:
2102 University Avenue West Saint Paul, MN 55114**